Ilaahay xagiisa waxaa dadka ugu cadaab kulul maalinta qiyaame kuwa Ilaahay khalqigiisa wax u ekaysiiya

Caa'isha, Muminiinta Hooyadood- Allaha ka raali ahaadee- waxay tiri: Nabiga ayaa ii soo galay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- anigo sanduuqayga ku daboolay maro sawiro leh, Nabigu scw markuu arkay maradii wajigiisu waa isbedelay wuxuuna yiri: caa`ishoy Ilaahay xagiisa waxaa dadka ugu cadaab kulul maalinta qiyaame kuwa Ilaahay khalqigiisa wax u ekaysiiya, caa`isha waxay tiri: maradii waan kala jeexnay oo waxaan ka dhignay barkin ama laba barkimood.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ayaa u soo galay Caa'isha, wuxuu arkay iyadoo sanduuq alaabta lagu rido ku dabooshay maro sawiro wax naflay ahi ku sawiran yihiin, markaasaa Nabiga scw wejigiisu isbedelay isagoo Ilaahay darti u carooday, wuuna ka tuuray maradii, wuxuuna yiri: Dadka ugu cadaabta daran maalinta qiyaamaha waa kuwa u ekeysiinaaya sawiradooda makhluuqaadka Ilaahay. Caa'isha waxay tiri: waxaan ka dhignay barkimo ama labo barkimood.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/5931